Ogow **DHAMMAAN** faa'iidooyinkaaga

# Diiradda la saarayo: Daryeelka xaqiijinta jinsiga

## Waa maxay daryeelka xaqiijinta jinsigu?

**Inta ugu badan lagu tilmaamo, daryeelka xaqiijinta jinsigu waa daryeelka ixtiraamaya oo xaqiijinaya qofka bedeshay jinsiga 'transgender', aan jinsiyad gaar ah lahayn, ama dareenka qof jinsi isku jira leh.** Marka la eego helitaanka daaweynta la xiriirta isbeddelka, daryeelka xaqiijinta jinsiga waxaa loola jeedaa wax ka qabashada taageerta dadka xilliga kala guurka jinsiga.

## Maxaa la daboolay?

**CareOregon waxa ay daboosho waxaa ka mid ah daaweynta xaqiijinta jinsiga 'gender-affirming' sida uu dhigayo Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo Sharciga La Soo Jeediyay ee 2002.** Sida uu dhigayo sharciga Oregon, daaweynta xaqiijinta jinsiga waxaa loola jeedaa nidaam kasta, adeeg, daawo, qalab, ama alaab uu daryeel bixiye caafimaad qoro si qof looga daawo xaalad aan iswaafaqsanayn oo u dhaxaysa is aqoonsigiisa jinsi ahaaneed iyo jinsiga la isku qoondeeyay dhalashada.

***Fadlan ogow**: Waxaanu isticmaalnaa erey bixinta caafimaadka si wax loo kala caddeeyo oo loo fududeeyo marka ay timaado qorsheynta xaqiijinta jinsiga. Waan fahamsanahay in ay dhici karto in aadan isku aqoonsan ama kalsooni ku qabin adeegsiga qaar ka mid ah ereyadan si loo qeexo dareenkaaga iyo jirkaaga.*

### Daryeelka Caafimaadka

- Daaweynta hormoonnada
- Daaweynta caafimaadka dhimirka
- Daaweynta jireed ee qalliinka xoojinta muruqa
- Booqashooyinka daryeelka aasaasiga ah
- Xannibaadaha baaluqnimada
- Booqashooyinka dhakhtar takhasus leh
- Qalliinka soo saarida timaha (laser iyo electrolysis)
- Shaqada shaybaarka
- Wax ku sawirida jirka 'tattooing' ee caafimaad
- Daaweynta hadalka

### Daryeelka qalliinka

- Qalliinka naasaha & dib u dhiska laabta/yareynta
- Qalliinka weynaynta naasaha
- Qalliinka hagaajinta xubinta taranka ee ragga iyo qalliinka abuurista xubinka taranka ee ragga
- Qalliinka dib u dhiska xubinta taranka ee dumarka iyo qalliinka abuurista xubinta taranka ee dumarka
- Qalliinka iska saarida ilmo galeenka
- Qalliinka ka saarista qaab-dhismeedka xubnaha taranka
- Qalliinka iska saarida ugxan-sidaha
- Qalliinka iska saarida xiniinyaha
- Qalliinka iska saarida xubinta taranka ee ragga
- Qalliinka iska saarida maqaarka xiniinyaha
- Qalliinka hagaajinta xiniinyaha
- Qalliinka hagaajinta kaadi mareenka
- Qalliinka iska saarida xubinta taranka ee dumarka
- Qalliinka yareynta doobta/jocorta 'tracheal'.
- Qalliinka wejiga ee xaqiijinta jinsiga (oo uu ku jiro qalliinka dheddignimada wejiga)
- Qaab u yeelida jidhka
- Dib u eegida qaababka hore ee daaweynta xaqiijinta jinsiga

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booqo ***careoregon.org/GAC***

## Tallaabooyinka helitaanka adeegyada

1. **Ka bilow daryeelkaaga aasaasiga ah iyo bixiyayaasha caafimaadka dhimirka.**
2. **Si fiican adigu aqoon ugu yeelo waxka qabashada caafimaad iyo waxa adiga kuu wanaagsan.**
3. **Go'aanso haddii ogaanshaha dareenka laga qabo dhanka jinsiga 'gender dysphoria' uu lagama maarmaan u yahay helitaanka daryeelka aad u baahan tahay.**

**Liiska bixiyayaasha daryeelka xaqiijinta jinsiga oo heshiis lala galay,** kuwa khibrad iyo tababar u leh la shaqeynta dadka kuwaasi oo ah noocyada kala duwan ee jinsiga, waxaa laga heli karaa website-kayaga ***careoregon.org/GAC***

**Haddii aad caawimaad uga baahan tahay helitaanka adeegyo,** ama haddii aad rabto in aad qof kala hadasho wax ku saabsan adeegyada CareOregon ay bixiso, **Adeega Macmiilka ka wac 503-416-4100, khadka bilaashka ah 800-224-4840 ama TTY 711.**

## **Daryeelka xaqiijinta jinsiga waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid.** Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqiijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

## Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

**Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)** ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

**Health Share of Oregon (HSO)** waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

**CareOregon** waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya in ay bixiso daryeel. Waxaan sidoo kale gacan ka geysanaa isku duwida adeegyada luqadda ee loogu talagalay xubnaheena.

**Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP)** wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiiyayaasha iyo kuwo kale.

### CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- Daryeelka caafimaadka jirka
- Daryeelka caafimaadka dhimirka
- Daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka
- Daryeelka ilkaha
- Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

### Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- Isku duwida daryeelka
- Farmashiyaha
- Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- Kala doorashada gaadiidka
- Adeegyada turjumaada luqadda
- ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa warqadan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta.

**careoregon.org**